131. hawtaagin indhahaaga waxaan ugu raaxaynay nooc ka mid ah oo quruxda nolashaa adduun si aan ugu fidnayno, rizqiga Eebahaa yaase khayrroon oo hadhid badan.

وَلَا تَمُدَّنَّ عَيْنَيْكَ إِلَىٰ مَا مَتَّعْنَا بِهِۦٓ أَزْوَٰجًا مِّنْهُمْ زَهْرَةَ
ٱلْحَيَوٰةِ ٱلدُّنْيَا لِنَفْتِنَهُمْ فِيهِ ۚ وَرِزْقُ رَبِّكَ خَيْرٌ وَأَبْقَىٰ ١٣١

132. far ehelkaaga salaadda kuna samir korkeeda ku warsanmayno rizqiye annagaa ku arzuqi cidhibta (fiicana)waxaa iska leh dhawrsashada.

وَأْمُرْ أَهْلَكَ بِٱلصَّلَوٰةِ وَٱصْطَبِرْ عَلَيْهَا ۖ لَا نَسْـَٔلُكَ رِزْقًا ۖ
نَّحْنُ نَرْزُقُكَ ۗ وَٱلْعَٰقِبَةُ لِلتَّقْوَىٰ ١٣٢

133. waxay dheheen gaaladii muu noola yimaaddo aayad xagga Eebihiis ka timid, miyuuna u imaanin Maraggii wixii ku sugnaa Kutubihii hore.

وَقَالُوا۟ لَوْلَا يَأْتِينَا بِـَٔايَةٍ مِّن رَّبِّهِۦٓ ۚ
أَوَلَمْ تَأْتِهِم بَيِّنَةُ مَا فِى ٱلصُّحُفِ ٱلْأُولَىٰ ١٣٣

134. haddaan ku halaagno Cadaab Rasuulka (iyo Quraanka) ka hor waxay dhihilahaayeen Eebahannow maxaad noogu diri wayday rasuul oon raacno aayaadkaaga ka hor dullowganaga iyo khasaarahanaga.

وَلَوْ أَنَّآ أَهْلَكْنَٰهُم بِعَذَابٍ مِّن قَبْلِهِۦ
لَقَالُوا۟ رَبَّنَا لَوْلَآ أَرْسَلْتَ إِلَيْنَا رَسُولًا
فَنَتَّبِعَ ءَايَٰتِكَ مِن قَبْلِ أَن نَّذِلَّ وَنَخْزَىٰ ١٣٤

135. waxaad dhahdaa (Nabiyow) dhammaan way sugi ee suga,waxaad ogaan doontaan cidda jidka toosan iyo cidda hanuunsane.

قُلْ كُلٌّ مُّتَرَبِّصٌ فَتَرَبَّصُوا۟ ۖ فَسَتَعْلَمُونَ
مَنْ أَصْحَٰبُ ٱلصِّرَٰطِ ٱلسَّوِىِّ وَمَنِ ٱهْتَدَىٰ ١٣٥

Eebe wuxuu faray Nabiga (Naxariis iyo nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) inuusan dayin waxa adduunyo ah ee loogu raaxeeyey kuwaas gaalada ah illeen waa wax yar oo tagi, ee uu salaadda faro kuna samro, Eebaana wax arzuqa, cidhib fiicanna waxaa iska leh ciddii dhawrsata.
Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: Waxaan idiinku cabsi badnahay waxa Eebe idin siin oo quruxda adduunka ah waxayna dhaheen waa maxay quruxda adduunka Rasuul allow, wuxuu yidhi waa barakada dhulka. taasina u jeedadu ma aha inaan la shaqaysan, waa inayan aduunyada kaliya ku shuqlinin. aayadaha dambe waxay ka warrami inay gaaladu xaqa diidi isagoo Nabiga loogu caddeeyey kutubihii hore,haddii la halaago iyagoon Rasuul loo soo dirin waxay ku caban lahaayeen maxaa naloo halaagay anagoon rasuul naloo soo dirin. hase la sugo way kala caddaan cidda toosan iyo tan qaloocsan. waxaana sugnaatay in umadda Nabigu ugu badnaan maalinta qiyaame. waase in wanaagga lagu dadaalo si loo noqdo ummadda Nabiga. Dhaahaa (131-135).

## Suurat Al-Anbiyaa’

## سُورَةُ الأَنبِيَاءِ

Magaca Eebe yaan ku Billaabaynaa ee Naxariis Guud iyo Mid Gaaraba Naxariista.

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Waxaa u dhawaaday Dadka

ٱقْتَرَبَ لِلنَّاسِ حِسَابُهُمْ

Xisaabtoodii iyagoo Halmaansho ku Sugan oo Jeedsan.

وَهُمْ فِي غَفْلَةٍ مُّعْرِضُونَ ﴿١﴾

2. Quraankastee oo uga Yimaadda Xagga Eebahood kana Soo darriya way maqlaan iyagoo Ciyaari.

مَا يَأْتِيهِم مِّن ذِكْرٍ مِّن رَّبِّهِم مُّحْدَثٍ
إِلَّا اسْتَمَعُوهُ وَهُمْ يَلْعَبُونَ ﴿٢﴾

3. Oy shuqloontahay Quluubtoodu, waxayna hoos u dhigeen Faqii kuwii Dulmi Falay (iyagoo dhihi) kanu ma waxaan Dad idinkoo kale ahaynbaa,ma waxaad u imanaysaan sixir idinkoo Arka.

لَاهِيَةً قُلُوبُهُمْ ۗ وَأَسَرُّوا النَّجْوَى الَّذِينَ ظَلَمُوا
هَلْ هَٰذَا إِلَّا بَشَرٌ مِّثْلُكُمْ ۖ أَفَتَأْتُونَ
السِّحْرَ وَأَنتُمْ تُبْصِرُونَ ﴿٣﴾

4. Wuxuu yidhi (Nabigii) Eebahaybaa Og Hadalka Samada ku Sugan iyo Dhulka, waana Maqle Oge ah.

قَالَ رَبِّي يَعْلَمُ الْقَوْلَ فِي السَّمَاءِ وَالْأَرْضِ ۖ
وَهُوَ السَّمِيعُ الْعَلِيمُ ﴿٤﴾

5. Waxay Dheheen (Gaaladii) Saas ma aha ee waa Qarowyo saa ma aha ee wuu Been Abuurtay, Saas ma aha ee waa gabayaa ee ha noo keeno Aayad Sidii Lagu diray Kuwii hore.

بَلْ قَالُوا أَضْغَاثُ أَحْلَامٍ بَلِ افْتَرَاهُ بَلْ هُوَ
شَاعِرٌ فَلْيَأْتِنَا بِآيَةٍ كَمَا أُرْسِلَ الْأَوَّلُونَ ﴿٥﴾

6. Mayna Rumeynin Hortood Magaalo aan Halaag (La doonay) ee Ma iyagaa Rumeyn.

مَا آمَنَتْ قَبْلَهُم مِّن قَرْيَةٍ أَهْلَكْنَاهَا ۖ أَفَهُمْ
يُؤْمِنُونَ ﴿٦﴾

Suuraddan Waxaa lagu Magacaabay Suuradda Ambiyada, Maxaayeelay waxaa ku soo Arooray Qisadooda. Aayadahanna waxay ka warrami inay Saacaddii Qiyaame Dhawdahay Dadkoo Halmaansan. Wixii u yimaadda Gaalada oo Xaq ahna way iska dhagaysan iyagoo Ciyaari, Faq Xunna Faqi oo isu Sheegi Inayan Maqlin Dad la mid ah, xaqana Ay Sixir ku Sheegeen, Eebaase og waxa cirka iyo Dhulka ku sugan Maqlina,Quraankuna ma aha wax lagu Qarway ama Heesaa la yimid,Nabiguna wuxuu ula yimid Xaq Cad, Maxayse waano Tari Mar Haddii Xaqa la Diido Lana Caasiyo.
Ibnu Cabbaas Wuxuu Yidhi: Maxaad leedihiin oo u Warsanaysaan Ehelu Kitaabka waxay Haystaan iyagoo Leexiyey oo Badalay o Siyaadiyey oo Nusqaamiyey,Kitaabkiinaana u dambeeyey Kitaabaha, Dhaar Eebee waad Akhriyeysaan isagoo Cad oon La dheehin. Al-Anbiyaa' (1-6).

---

7. Maanaan Dirin Hortaa Rag mooyee,kuwaas oon u Waxyoonay,ee Warsada kuwa Cilmiga leh Haddaydaan wax Ogayn.

وَمَا أَرْسَلْنَا قَبْلَكَ إِلَّا رِجَالًا نُّوحِي إِلَيْهِمْ ۖ فَاسْأَلُوا
أَهْلَ الذِّكْرِ إِن كُنتُمْ لَا تَعْلَمُونَ ﴿٧﴾

8. Kamaanaan Dhigin (Nabiyada) Jasad (Muqaal) oon Cunayn Cunno mana ahayn kuwo Waara.

وَمَا جَعَلْنَاهُمْ جَسَدًا لَّا يَأْكُلُونَ الطَّعَامَ
وَمَا كَانُوا خَالِدِينَ ﴿٨﴾

9. Markaasna waxaan u Rumeynay Yaboohii waana Korrinay iyagii iyo Ciddaan Doono,waxaana Halaagnay Xadgudbayaasha.

ثُمَّ صَدَقْنَاهُمُ الْوَعْدَ فَأَنجَيْنَاهُمْ وَمَن نَّشَاءُ
وَأَهْلَكْنَا الْمُسْرِفِينَ ﴿٩﴾

10. Waxaan idiin soo Dejinay Kitaab Sharaftiinnu ku Sugantahayee Miyeydaan Kasayn.

لَقَدْ أَنزَلْنَآ إِلَيْكُمْ كِتَٰبًا فِيهِ ذِكْرُكُمْ أَفَلَا
تَعْقِلُونَ ﴿١٠﴾

11. Badanaana intaan Halaagnay Magaalo Dulmi Badan (Dadkeedu) oon Ahaysiinay Gadaasheed Qoom kale.

وَكَمْ قَصَمْنَا مِن قَرْيَةٍ كَانَتْ ظَالِمَةً
وَأَنشَأْنَا بَعْدَهَا قَوْمًا ءَاخَرِينَ ﴿١١﴾

12. Markay kaseen Cadaabkanaga yey ahaayeen kuwo ka Carari.

فَلَمَّآ أَحَسُّوا۟ بَأْسَنَآ إِذَا هُم مِّنْهَا يَرْكُضُونَ ﴿١٢﴾

13. Ha Cararina kuna noqda wixii laydiinku Raaxeeyey iyo Guryihiinna waxay u Dhawdahay in wax laydin warsadee.

لَا تَرْكُضُوا۟ وَٱرْجِعُوٓا۟ إِلَىٰ مَآ أُتْرِفْتُمْ فِيهِ
وَمَسَٰكِنِكُمْ لَعَلَّكُمْ تُسْـَٔلُونَ ﴿١٣﴾

14. Waxay Dhaheen Halaaganagee waxaan nahay Daalimiin.

قَالُوا۟ يَٰوَيْلَنَآ إِنَّا كُنَّا ظَٰلِمِينَ ﴿١٤﴾

15. Saasna kuma tagin Qayladoodu intaan ka yeello, wax la Shafay oo Bakhtiya.

فَمَا زَالَت تِّلْكَ دَعْوَىٰهُمْ حَتَّىٰ جَعَلْنَٰهُمْ
حَصِيدًا خَٰمِدِينَ ﴿١٥﴾

**Illeen wuxuu u waxyooday Nabiyo Badan oo Rag ah oon Malaa'ig ahayn, wuxuuna faray Dadka Cilmiga iyo Aqoonta leh, Nabiyaduna waxbay Cuni Jireen ee ma ahayn Muuqaal aan wax Cunin, wayna Dhinteen,**
**Eebana wuxuu u Rumeeyey Yaboohiisii wuuna koriyey Cidduu Doono, wuxuuna Halaagi Xadgudbayaasha, Quraankuna waa Sharafta Mu'miniinta Ciddii dulmi fashana waa la Halaagi Waxaana lagu Badali Dad kale. Markay Dhibaatada Arkaanna way Carari, waxaana loo Dhihi ha Cararina ee Raaxadiinna ku Noqda iyo Guryihiinna waxbaa laydin Warsane, wayna Shaleytoon intay ka noqdaan Wax Ebar ah oo bakhti ah. Al-Anbiyaa' (7-15).**

---

16. Maanaan Abuurin Samooyinka iyo Dhulka iyo waxa u Dhaxeeya Anagoo Ciyaari.

وَمَا خَلَقْنَا ٱلسَّمَآءَ وَٱلْأَرْضَ وَمَا بَيْنَهُمَا لَٰعِبِينَ ﴿١٦﴾

17. Haddaan Doono Madadaallo inaan yeelano waxaan ka yeelan lahayn Agtanada haddaan Falayno.

لَوْ أَرَدْنَآ أَن نَّتَّخِذَ لَهْوًا لَّٱتَّخَذْنَٰهُ مِن لَّدُنَّآ
إِن كُنَّا فَٰعِلِينَ ﴿١٧﴾

18. Xaqaanse ku Gannaa Baadilka oo Tirtira markaasuu tagaa, waxaa idiinku Sugnaaday Halaag waxaad Sheegaysaan.

بَلْ نَقْذِفُ بِٱلْحَقِّ عَلَى ٱلْبَٰطِلِ فَيَدْمَغُهُۥ
فَإِذَا هُوَ زَاهِقٌ ۚ وَلَكُمُ ٱلْوَيْلُ مِمَّا تَصِفُونَ ﴿١٨﴾

19. Ilaahay waxaa u sugnaaday waxa Samooyinka ku sugan iyo Dhulka, kuwa Eebe Agtiisa ahna Iskama Kibriyaan Cibaadadiisa kamana daalaan.

وَلَهُۥ مَن فِى ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلْأَرْضِ ۚ وَمَنْ عِندَهُۥ
لَا يَسْتَكْبِرُونَ عَنْ عِبَادَتِهِۦ وَلَا يَسْتَحْسِرُونَ ﴿١٩﴾

20. wayna Nasahaan Habeen iyo Dharaarba kamana Noogaan.

يُسَبِّحُونَ ٱلَّيْلَ وَٱلنَّهَارَ لَا يَفْتُرُونَ ﴿٢٠﴾

21. Mise waxay yeesheen (Gaaladii) Ilaahyaal Dhulka Xaggiisa oo wax soo Nooleeya.

أَمِ ٱتَّخَذُوٓا۟ ءَالِهَةً مِّنَ ٱلْأَرْضِ هُمْ يُنشِرُونَ ﴿٢١﴾

22. Hadday Yihiin dhexdooda (Samada iyo Dhulka) Ilaahyo way Fasaadi Lahaayeen, waxaa ka Nasahan Eebaha Carshiga leh waxay ku Tilmaami.

لَوْ كَانَ فِيهِمَآ ءَالِهَةٌ إِلَّا ٱللَّهُ لَفَسَدَتَا ۚ
فَسُبْحَـٰنَ ٱللَّهِ رَبِّ ٱلْعَرْشِ عَمَّا يَصِفُونَ ﴿٢٢﴾

23. Lama warsanayo wuxuu Falo Iyagase waa la Warsan.

لَا يُسْـَٔلُ عَمَّا يَفْعَلُ وَهُمْ يُسْـَٔلُونَ ﴿٢٣﴾

**Ilaaheen waa ka Dheeryahay Ciyaar iyo Xumaanba, Cirka, Dhulka iyo Khalqiga kalana wuxuu u Abuuray Xaq iyo in Cid walba laga Abaal mariyo waxay kasbato. Malaa'igtuna iskama Waynayso Cibaadada Eebe, kamana Daalaan Habeen iyo Dharaar Nasihidiisa, wax isaga ka soo hadhay oo Ilaah ah oo wax nooleeyana ma jiro. Hadday Cirka iyo dhulka Joogaan Ilaahyo way Fasaadi lahaayeen oo Xumaan lahaayeen, maxaa yeelay midba waxbuu Doonilahaa Markaasuu amarku iska hor imaan lahaa, Saas darteed Ilaaheennu waa kali, Wahella uma Baahna, Xumaanna waa ka Fogyahay, Sharafna isagaa iska leh, wuxuu doonana wuu falaa, Cid warsanna ma jirto. Ruuxii Caqli Darro iyo Islawayni aan meel jirin udiidana waa Jaahil aan wax ogayn Lana kulmi Abaalkiisa.**
**Saas darteed waa in si dhab ah loo Caabudo Eebe kaliya. Al-Anbiyaa' (16-23).**

---

24. Mise waxay Yeesheen Eebe ka sokow Ilaahyo, waxaad Dhahdaa keena Xujadiinna, kani waa (quraanka) sheegi waxa ila jooga iyo sheegiddii kuwii iga horreeyey, Badidoodse ma oga Xaqa wayna ka Jeedsan.

أَمِ ٱتَّخَذُوا۟ مِن دُونِهِۦٓ ءَالِهَةً ۖ قُلْ هَاتُوا۟ بُرْهَـٰنَكُمْ ۖ
هَـٰذَا ذِكْرُ مَن مَّعِىَ وَذِكْرُ مَن قَبْلِى ۗ بَلْ أَكْثَرُهُمْ لَا يَعْلَمُونَ
ٱلْحَقَّ ۖ فَهُم مُّعْرِضُونَ ﴿٢٤﴾

25. Rasuulkaan hortaa dirayba waxaan u waxyoonay ilaah aan Ani ahayn ma jiro ee I caabuda.

وَمَآ أَرْسَلْنَا مِن قَبْلِكَ مِن رَّسُولٍ إِلَّا نُوحِىٓ إِلَيْهِ
أَنَّهُۥ لَآ إِلَـٰهَ إِلَّآ أَنَا۠ فَٱعْبُدُونِ ﴿٢٥﴾

26. waxay dhaheen Gaaladii wuxuu Yeeshay (Eebaha) Raxmaana Ilmo, waa ka Nasahanyahay, waase Addoomo (Malaa'igtu) la Sharrifo.

وَقَالُوا۟ ٱتَّخَذَ ٱلرَّحْمَـٰنُ وَلَدًا ۗ سُبْحَـٰنَهُۥ ۚ
بَلْ عِبَادٌ مُّكْرَمُونَ ﴿٢٦﴾

27. kagama hor maraan Hadal iyaguna Amarkiisay ku Camalfalaan.

لَا يَسْبِقُونَهُۥ بِٱلْقَوْلِ وَهُم
بِأَمْرِهِۦ يَعْمَلُونَ ﴿٢٧﴾

28. wuxuu ogyahay waxa hortooda iyo Gadaashooda ah umana shafeecaan Ciduu ka raalliyahay mooyee iyaguna Cabsidiisay la Baqaan.

يَعْلَمُ مَا بَيْنَ أَيْدِيهِمْ وَمَا خَلْفَهُمْ وَلَا يَشْفَعُونَ
إِلَّا لِمَنِ ٱرْتَضَىٰ وَهُم مِّنْ خَشْيَتِهِۦ مُشْفِقُونَ ﴿٢٨﴾

29. ruuxii dhaha oo ka mid ah Malaa'igta anaa Ilaah ah Eebe ka so-

۞ وَمَن يَقُلْ مِنْهُمْ إِنِّىٓ إِلَـٰهٌ مِّن دُونِهِۦ فَذَٰلِكَ

نَجْزِيهِ جَهَنَّمَ كَذَٰلِكَ نَجْزِي الظَّالِمِينَ ﴿٢٩﴾

kow, kaas waxaannu ku Abaal marin Jahannamo, saasaana ku Abaal marinnaa Daalimiinta.

Eebe waa kali wax ka soo hadhay oo Ilaah ahna ma jiro, saasaana ku qoran Quraanka iyo Kutubtii ka Horraysayba, Rasuul kastana wuxuu Eebe u waxyooday in Ilaahay kali yahay lana Caabudo. Malaa'igtuna Ilmo ma aha Eebe waase addoomo sharaf leh, oon Eebe Caasiyayn, uuna ogyahay waxay fali iyo xaalkoodaba, waxay u shafeecina ma jiro Cid Eebe ka raalli noqday mooyee'isaga unbayna ka yaabaan, kana Cabsadaan, Ciddii Ilaahnimo sheegatana Eebe ka sokow wuxuu Ilaahay ku abaal marin Naarta Jahannamo, saasuuna ku abaalmariyaa Daalimiinta, saas darteed Eebeha Xaqa ah wax Dila, wax Nooleeya; wax Arzuqa, Roobka keena, sharciga soo dajiya, Loo wada baahanyahay ka kaaftooma Dadka waa uun Ilaaheenna Awoodda leh. Al-Anbiyaa' (24-29).

---

أَوَلَمْ يَرَ الَّذِينَ كَفَرُوا أَنَّ السَّمَاوَاتِ وَالْأَرْضَ كَانَتَا رَتْقًا فَفَتَقْنَاهُمَا وَجَعَلْنَا مِنَ الْمَاءِ كُلَّ شَيْءٍ حَيٍّ أَفَلَا يُؤْمِنُونَ ﴿٣٠﴾

30. miyeyna arkayn kuwii Gaaloobay in Samooyinka iyo dhulku ahaayeen kuwo isku dhaggan oona kala Bixinay, kana yeelay Biyaha wax kasta oo Nool ee miyeyna Rumaynayn.

وَجَعَلْنَا فِي الْأَرْضِ رَوَاسِيَ أَنْ تَمِيدَ بِهِمْ وَجَعَلْنَا فِيهَا فِجَاجًا سُبُلًا لَعَلَّهُمْ يَهْتَدُونَ ﴿٣١﴾

31. waxaana yeellay Dhulka Sugayaal (buuro) inayna la iilanin Dadka, waxaana yeellay Dhexdeeda Karimo Waddooyin ah, inay ku Toosaan.

وَجَعَلْنَا السَّمَاءَ سَقْفًا مَحْفُوظًا وَهُمْ عَنْ آيَاتِهَا مُعْرِضُونَ ﴿٣٢﴾

32. waxaana ka yeelay Samada Saanqaaf ilaashan iyaguna Calaamooyinkeeda way ka jeedsan.

وَهُوَ الَّذِي خَلَقَ اللَّيْلَ وَالنَّهَارَ وَالشَّمْسَ وَالْقَمَرَ كُلٌّ فِي فَلَكٍ يَسْبَحُونَ ﴿٣٣﴾

33. Eebe waa kan Abuuray Habeenka, Maalinta, Qorraxda iyo dayaxa mid kastana Falag buu Dhexdabbaalan.

وَمَا جَعَلْنَا لِبَشَرٍ مِنْ قَبْلِكَ الْخُلْدَ أَفَإِنْ مِتَّ فَهُمُ الْخَالِدُونَ ﴿٣٤﴾

34. maanan yeelin Dadka ka horreeyey kuwo waara ee haddaad dhimato ma iyagaa waari (Gaaladu).

كُلُّ نَفْسٍ ذَائِقَةُ الْمَوْتِ وَنَبْلُوكُمْ بِالشَّرِّ وَالْخَيْرِ فِتْنَةً وَإِلَيْنَا تُرْجَعُونَ ﴿٣٥﴾

35. Naf kastaa waxay dhadhamin Geeri waxaana idinku Imtixaami Shar iyo Khayr Ibtilo darteed, xagganagaana laydiin soo Celin.

Ilaahay wuxuu ka warrami awooddiisa weyn iyo in Cirka, Dhulka, ahaayeen kuwo isku dhaggan Eebaana ka keenay Roobka iyo dooga, wax kastoo Noolna Biyo ka ahaaday, Dhulkana Buura yeelay si dhulka loogu Sugo'looguna Taago, cirkana ka yeelay Saanqaaf Ilaashan, Habeenka, dharaarta, Qorraxda iyo Dayaxana Falagooda iyo Meejooda u Sahlay. Tan kale cid waari oo Dad ah ma jirto, ee Ruux walba wuu dhiman, waxaase loo baahanyahay Camal Fiican ee ma haboona in Geerida cidda Wanaagga fali la Jeclaado.

Rasuulkuna (naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: Wax walba waxaa laga Abuuray Biyo. Waxaa sheegay Imaam Axmed.

Ibnu Cabaasna wuxuu yidhi: Waxaa laysku Imtixaami Shar, Dhibaato, Barwaaqo, Caafimaad, Cudur, Hodan, Saboolnimo, Xalaal, Xaaraan, Dhaaco, Macsiyo, Hanuun iyo baadi. Al-Anbiyaa' (30-35).

36. markay ku arkaan kuwii Gaaloobay waxay kaa yeeshaan jeesjees iyagoo dhihi ma kanaa kan sheegi Ilaahyihiinna iyagoo ka gaaloobi xusidda Eebaha Raxmaana.

وَإِذَا رَءَاكَ ٱلَّذِينَ كَفَرُوٓاْ إِن يَتَّخِذُونَكَ
إِلَّا هُزُوًا أَهَـٰذَا ٱلَّذِى يَذْكُرُ ءَالِهَتَكُمْ
وَهُم بِذِكْرِ ٱلرَّحْمَـٰنِ هُمْ كَـٰفِرُونَ ﴿٣٦﴾

37. waxaa laga abuuray Dadka Deg deg, waxaana idin tusin Aayaadkayga ee ha degdegina.

خُلِقَ ٱلْإِنسَـٰنُ مِنْ عَجَلٍ سَأُو۟رِيكُمْ
ءَايَـٰتِى فَلَا تَسْتَعْجِلُونِ ﴿٣٧﴾

38. waxay dhihi waa goorma Yaboohii (Cadaabku) haddaad run sheegaysaan.

وَيَقُولُونَ مَتَىٰ هَـٰذَا ٱلْوَعْدُ
إِن كُنتُمْ صَـٰدِقِينَ ﴿٣٨﴾

39. hadday ogyihiin kuwii Gaaloobay markaan laga reebeyn Wajiyadooda Naarta iyo Dhabarkooda oon loona gargaarayn (ma degdegsadeen).

لَوْ يَعْلَمُ ٱلَّذِينَ كَفَرُوا۟ حِينَ لَا يَكُفُّونَ
عَن وُجُوهِهِمُ ٱلنَّارَ وَلَا عَن ظُهُورِهِمْ
وَلَا هُمْ يُنصَرُونَ ﴿٣٩﴾

40. waxayse ugu imaan (naartu) si kada ah wayna wareerin mana karayaan Celinteeda lamana Sugo.

بَلْ تَأْتِيهِم بَغْتَةً فَتَبْهَتُهُمْ
فَلَا يَسْتَطِيعُونَ رَدَّهَا وَلَا هُمْ يُنظَرُونَ ﴿٤٠﴾

41. waxaa lagu jees jeesay Rasuullo kaa horreeyey waxaana ku dhacay kuwii ku jees jeesay oo Gaalada ah waxay ku jees jeesi jireen.

وَلَقَدِ ٱسْتُهْزِئَ بِرُسُلٍ مِّن قَبْلِكَ فَحَاقَ بِٱلَّذِينَ
سَخِرُوا۟ مِنْهُم مَّا كَانُوا۟ بِهِۦ يَسْتَهْزِءُونَ ﴿٤١﴾

42. waxaad dhahdaa yaa idinka Ilaalin Habeen iyo Dharaarba Eebaha Raxmaana waxayse iyagu ka jeedsan Xusidda Eebahood.

قُلْ مَن يَكْلَؤُكُم بِٱلَّيْلِ وَٱلنَّهَارِ مِنَ ٱلرَّحْمَـٰنِ
بَلْ هُمْ عَن ذِكْرِ رَبِّهِم مُّعْرِضُونَ ﴿٤٢﴾

43. ma waxaa u sugnaaday Ilaahyo naga celin ma karaan (waxay caabudi) Gargaarka Naftooda nalagamana Magan galiyo.

أَمْ لَهُمْ ءَالِهَةٌ تَمْنَعُهُم مِّن دُونِنَا
لَا يَسْتَطِيعُونَ نَصْرَ أَنفُسِهِمْ وَلَا هُم مِّنَّا
يُصْحَبُونَ ﴿٤٣﴾

Ma habboona in Cid Xaqa u yeedhi lagu jees jeeso, isagoo xaqa la diidi'Dabeecadda Dadkana waxaa ka mid ah inay Dag dagaan oo wax dheeraystaan'waxaase imaan Maalin Gaalo wax cadaab ka baajin jirin, cadaabna ugu imaan kado, oyna arki Cidhibta xumaanta, wax Eebe Dadka ka ilaalinna ma jiro Habeen iyo Maalin midna wax Eebe ka soo hadhay oo wax reebina ma jiro, maxaayeelay iyagaaba naftooda wax u tarin, qudradiisa hadalkana wuxuu ku uruursanyahay Awoodda Eebe, Tabar yari iyo Baahida Dadka. Al-Anbiyaa' (36-43).

---

44. Saas ma aha ee waxaan u Raaxaynay kuwaas iyo Aabayaalkood Intuu ku Dheeraado Cimrigu, Miyeyna Arkayn Inaannu ku imanayno Dhulka Anagoo Nusqaamin (Guusha Islaamka) Miyagaa Adag.

بَلْ مَتَّعْنَا هَـٰٓؤُلَآءِ وَءَابَآءَهُمْ حَتَّىٰ طَالَ عَلَيْهِمُ
ٱلْعُمُرُ أَفَلَا يَرَوْنَ أَنَّا نَأْتِى ٱلْأَرْضَ نَنقُصُهَا
مِنْ أَطْرَافِهَآ أَفَهُمُ ٱلْغَـٰلِبُونَ ﴿٤٤﴾

45. Waxaad Dhahdaa waxaa uun aan idiinku Digi Waxyiga Mana Maqlo Dhagoole Dhawaaqa marka loo Digi.

قُلْ إِنَّمَآ أُنذِرُكُم بِٱلْوَحْيِ ۚ وَلَا يَسْمَعُ ٱلصُّمُّ
ٱلدُّعَآءَ إِذَا مَا يُنذَرُونَ ﴿٤٥﴾

46. Hadduu Taabto wax Yar oo Cadaabka Eebahaa ah waxay Odhan Halaagganagee Anagaa Daalimiin ah,.

وَلَئِن مَّسَّتْهُمْ نَفْحَةٌ مِّنْ عَذَابِ رَبِّكَ
لَيَقُولُنَّ يَٰوَيْلَنَآ إِنَّا كُنَّا ظَٰلِمِينَ ﴿٤٦﴾

47. Waxaannu u Dejinaynaa Miisaanka Caadilka ah Maalinta Qiyaame lagamana Dulmiyo Naf waxba, haba ahaado wax la eg Xabbad Khardal ah (wax yar) ee waan siinaynaa, annagaana ugu Filan Xisaabiye.

وَنَضَعُ ٱلْمَوَٰزِينَ ٱلْقِسْطَ لِيَوْمِ ٱلْقِيَٰمَةِ فَلَا تُظْلَمُ
نَفْسٌ شَيْـًٔا ۖ وَإِن كَانَ مِثْقَالَ حَبَّةٍ
مِّنْ خَرْدَلٍ أَتَيْنَا بِهَا ۗ وَكَفَىٰ بِنَا حَٰسِبِينَ ﴿٤٧﴾

48. Dhab ahaan yaan u Siinay (Nabi) Muuse iyo (Nabi) Haaruun kala Bixiye (Tawreed) iyo Nuur iyo Waanada kuwo Dhawrsada.

وَلَقَدْ ءَاتَيْنَا مُوسَىٰ وَهَٰرُونَ ٱلْفُرْقَانَ وَضِيَآءً
وَذِكْرًا لِّلْمُتَّقِينَ ﴿٤٨﴾

49. Oo ah kuwa ka Cabsada Eebahood iyagoo kali ah iyagoo Saacadda (Qiyaame) ka Cabsan.

ٱلَّذِينَ يَخْشَوْنَ رَبَّهُم بِٱلْغَيْبِ
وَهُم مِّنَ ٱلسَّاعَةِ مُشْفِقُونَ ﴿٤٩﴾

50. Kan (Quraankuna) waa Quraan la Barakeeyey oon Soo Dejinay ee midinkaa Diidi Isaga.

وَهَٰذَا ذِكْرٌ مُّبَارَكٌ أَنزَلْنَٰهُ ۚ أَفَأَنتُمْ لَهُۥ مُنكِرُونَ ﴿٥٠﴾

**Gaalada waxaa Xumaanta ku Qaaday ku Raaxaysiga Adduunka, waase inay ku Waano Qaataan Faafidda Islaamka iyo Guusha. Waxaase Jirta inaan Cid Dhuntay Hanuunin karin, Markuuse Taabto Ciqaab Yar Yey Calaalacalaan oo dhawaaqaan, Eebaase Miisaan Caddaalada Joojin Maalinta Qiyaame, Cid la Dulminna ma jirto, Eebahaana ku Filan Xisaab. Nabi Muuse iyo Nabi Haaruunna wuxuu Siiyey Eebe Kitaabkii Tawreed, oy ku Hanuuniyeen kuwa Eebe ka yaaba, Quraankuna waa Kitaab la Barakeeyey Cidii Diida Umbaase Khasaartay oo dhuntay Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) wuxuu yidhi: Laba Kalimo oo u fudud Carrabka kuna Culus Miisaanka Eebana Jecelyahay waa: waxaa Nasahan oo Mahadsan Eebaha Wayn. Waxaa Wariyey Bukhaari iyo Muslim. Al-Anbiyaa' (44-50).**

---

51. Dhab ahaan waxaan u Siinay Nabi Ibraahim Hanuunkiisa mar hore anagaana Ogayn.

۞ وَلَقَدْ ءَاتَيْنَآ إِبْرَٰهِيمَ رُشْدَهُۥ مِن قَبْلُ وَكُنَّا
بِهِۦ عَٰلِمِينَ ﴿٥١﴾

52. Markuu ku Yidhi Aabihiis iyo Qoomkiisii waa maxay Sawiradan aad ku kor Negidihiin (Caabudaysaan).

إِذْ قَالَ لِأَبِيهِ وَقَوْمِهِۦ مَا هَٰذِهِ ٱلتَّمَاثِيلُ ٱلَّتِيٓ
أَنتُمْ لَهَا عَٰكِفُونَ ﴿٥٢﴾

53. waxay Dheheen waxaan Hellay Aabayaalkanno oo Caabudi.

قَالُوا۟ وَجَدْنَآ ءَابَآءَنَا لَهَا عَٰبِدِينَ ﴿٥٣﴾

54. Wuxuu yidhi (Nabi) Ibraahim waxaad ku Sugantihiin idinka iyo

قَالَ لَقَدْ كُنتُمْ أَنتُمْ وَءَابَآؤُكُمْ

Aabayaalkiin Baadi Cad.

فِي ضَلَٰلٖ مُّبِينٖ ٥٤

55. Waxay Dheheen ma waxaad Noola Timid Xaq Mise Adigu waxaad ka mid Tahay kuwa Ciyaari.

قَالُوٓاْ أَجِئۡتَنَا بِٱلۡحَقِّ أَمۡ أَنتَ مِنَ ٱللَّٰعِبِينَ ٥٥

56. Wuxuuna Yidhi Eebihiin waa Eebaha Samooyinka iyo Dhulka ee ah Kan Abuuray Aniguna Arrintaas yaan ahay kuwa ka Marag Kici.

قَالَ بَل رَّبُّكُمۡ رَبُّ ٱلسَّمَٰوَٰتِ وَٱلۡأَرۡضِ ٱلَّذِي فَطَرَهُنَّ وَأَنَا۠ عَلَىٰ ذَٰلِكُم مِّنَ ٱلشَّٰهِدِينَ ٥٦

57. Eebaan ku Dhaartaye waan Dhagri Sanamyadiinna ka Dib markaad Jeedsataan Idinkoo Tagi.

وَتَٱللَّهِ لَأَكِيدَنَّ أَصۡنَٰمَكُم بَعۡدَ أَن تُوَلُّواْ مُدۡبِرِينَ ٥٧

58. Wuxuuna ka Yeelay Burbur, Koodii waynaa mooye inay Xaggiisa u Noqdaan (Inuu Jajabiyey Isagu).

فَجَعَلَهُمۡ جُذَٰذًا إِلَّا كَبِيرٗا لَّهُمۡ لَعَلَّهُمۡ إِلَيۡهِ يَرۡجِعُونَ ٥٨

59. waxay Dheheen yaa ku falay Sidan Ilaahyadanadii Kaasi waa Daalime.

قَالُواْ مَن فَعَلَ هَٰذَا بِـَٔالِهَتِنَآ إِنَّهُۥ لَمِنَ ٱلظَّٰلِمِينَ ٥٩

60. Waxayna Dheheen Waxaan Maqallay Wiil Sheegi lana Dhaho Ibraahim.

قَالُواْ سَمِعۡنَا فَتٗى يَذۡكُرُهُمۡ يُقَالُ لَهُۥٓ إِبۡرَٰهِيمُ ٦٠

61. Waxay Dheheen keena dadka Indhihiisa inay ku Marag Furaan.

قَالُواْ فَأۡتُواْ بِهِۦ عَلَىٰٓ أَعۡيُنِ ٱلنَّاسِ لَعَلَّهُمۡ يَشۡهَدُونَ ٦١

**Nabi Ibraahim Eebaa Hanuuniyey Mar hore, wuxuuna ka reebay Qoomkiisii iyo Aabihiisba waxay Caabudayeen ee Eebe ka Soo Hadhay, wayse ku Madax Adaygeen Inkastoos u Caddeeyey Kalinimada Eebe iyo Awooddiisa, markuu ka Daalayna wuxuu Jajabiyey Waxay Caabudayeen Kii u Weynaa Mooyee inay u noqdaan isaga, markay is warsadeen Cidda Saas yeeshayna waxay isu Sheegeen inuu Ibraahim yahay,waxayna horkeeneen Dadkii si loo Arko oo loogu marag Furo. Al-Anbiyaa' (51-61).**

---

62. waxay Dheheen Gaaladii Maadaa ku Falay Sidan Ilaahyadannada Ibraahimow.

قَالُوٓاْ ءَأَنتَ فَعَلۡتَ هَٰذَا بِـَٔالِهَتِنَا يَٰٓإِبۡرَٰهِيمُ ٦٢

63. Wuxuu Yidhi waxaa Falay Kooda Weyn ee Kana, Waydiiya Hadday Hadli.

قَالَ بَلۡ فَعَلَهُۥ كَبِيرُهُمۡ هَٰذَا فَسۡـَٔلُوهُمۡ إِن كَانُواْ يَنطِقُونَ ٦٣

64. Markaasay u Noqdeen Naftooda waxayna Isu Dhaheen war Idinkaa Daalimiina.

فَرَجَعُوٓاْ إِلَىٰٓ أَنفُسِهِمۡ فَقَالُوٓاْ إِنَّكُمۡ أَنتُمُ ٱلظَّٰلِمُونَ ٦٤

65. Markaasaa Loogadiyey Madax-

ثُمَّ نُكِسُواْ عَلَىٰ رُءُوسِهِمۡ لَقَدۡ عَلِمۡتَ

ooda (waxayna Dhaheen) Dhabbaad u Ogtahay inayna kuwani Hadlayn.

مَا هَٰٓؤُلَآءِ يَنطِقُونَ ﴿٦٥﴾

66. Wuxuu Yidhi ma waxaad Caabudaysaan Eebe ka Sokow waxaan Idin Anfacayn waxba idinna Dhibayn.

قَالَ أَفَتَعْبُدُونَ مِن دُونِ ٱللَّهِ
مَا لَا يَنفَعُكُمْ شَيْـًٔا وَلَا يَضُرُّكُمْ ﴿٦٦﴾

67. Ufbaa laydin Yidhi Idinka iyo Waxaad Caabudaysaan Eebe ka Sokow Miyeydaan wax kaseyn.

أُفٍّ لَّكُمْ وَلِمَا تَعْبُدُونَ
مِن دُونِ ٱللَّهِ أَفَلَا تَعْقِلُونَ ﴿٦٧﴾

68. Waxay Dhaheen Guba una Gargaara Ilaahyadiinna Haddaad wax Falaysaan.

قَالُوا۟ حَرِّقُوهُ وَٱنصُرُوٓا۟ ءَالِهَتَكُمْ إِن كُنتُمْ
فَٰعِلِينَ ﴿٦٨﴾

69. Waxan Nidhi Naaray u Noqo Qabow iyo Nabadgalyo Ibraahim.

قُلْنَا يَٰنَارُ كُونِى بَرْدًا وَسَلَٰمًا عَلَىٰٓ إِبْرَٰهِيمَ ﴿٦٩﴾

70. Waxay la Dooneen Dhagar waxaana ka yeellay kuwo Khasaaray.

وَأَرَادُوا۟ بِهِۦ كَيْدًا فَجَعَلْنَٰهُمُ ٱلْأَخْسَرِينَ ﴿٧٠﴾

**Nabi Ibraahim markuu ka Garhelay Gaaladii Hadal Cadna ku Yidhi yey Goosteen inay Gubaan oo Dab ku Tuuraan, Taasina waa Caadada Jaahiliinta in marka laga Gar helo Mu'miniinta ku Jeedsadaan Xumaanna u Maamulaan, Eebaase ka Nabadgaliyey Dhagartii,kana Koriyey Dabkii, Gaaladii iyo Waxay Caabudayeenna Khasaare ku Dambaysiiyey, Wuxuuna Xusay Nabi Ibraahim Eebe markii lagu Tuuray Dabka. Ibnu Cabbaas Wuxu Yidhi:«Waxaa i kaafiya Eebe Isagaana u Fiican Wakiil» Waxaa yidhi Nabi Ibraahim markii Dabka lagu Tuuray, Nabiga Muxamed ahna Eebe ha Nabadgaliyee Markii lagu Yidhi Dadkiibaa Idiin Kulmay, Waxaa wariyey Bukhaari.**
**Taasina waxay ku tusin in Xaqu Sarrayn Guulaysanna markii si Dhab ah Eebe loogu Xidhnaado lana Caabudo. Al-Anbiyaa' (62-70).**

---

71. Waannu u Korinay (Nabi) Ibraahim iyo Nabi Luudh Dhulkii aan u Barakaynay Caalamka (Shaam).

وَنَجَّيْنَٰهُ وَلُوطًا إِلَى ٱلْأَرْضِ
ٱلَّتِى بَٰرَكْنَا فِيهَا لِلْعَٰلَمِينَ ﴿٧١﴾

72. Waxaan Siinay Isxaaq iyo Yacquub oo Siyaada ah, waxaana ka Yeellay Dhammaan kuwo Suubban.

وَوَهَبْنَا لَهُۥٓ إِسْحَٰقَ وَيَعْقُوبَ نَافِلَةً ۖ
وَكُلًّا جَعَلْنَا صَٰلِحِينَ ﴿٧٢﴾

73. Waxaana ka yeellay Imaamyo ku Hanuuniya Amarkanaga,waxaana u waxyoonay Falidda Khayrka, Oogidda Salaadda iyo Bixinta Sakada waxayna ahaayeen kuwo Na caabuda.

وَجَعَلْنَٰهُمْ أَئِمَّةً يَهْدُونَ بِأَمْرِنَا وَأَوْحَيْنَآ
إِلَيْهِمْ فِعْلَ ٱلْخَيْرَٰتِ وَإِقَامَ ٱلصَّلَوٰةِ
وَإِيتَآءَ ٱلزَّكَوٰةِ ۖ وَكَانُوا۟ لَنَا عَٰبِدِينَ ﴿٧٣﴾

74. (Nabi) Luudhna waxaan Siinay Xukun iyo Cilmi,waxaana ka Korinay Magaalaadii ahayd mid Fasha Xumo waxay ahaayeen Qoom Xun oo Faasiqiina.

وَلُوطًا ءَاتَيْنَٰهُ حُكْمًا وَعِلْمًا
وَنَجَّيْنَٰهُ مِنَ ٱلْقَرْيَةِ ٱلَّتِى كَانَت تَّعْمَلُ
ٱلْخَبَٰٓئِثَ ۚ إِنَّهُمْ كَانُوا۟ قَوْمَ سَوْءٍ فَٰسِقِينَ ﴿٧٤﴾

75. Waxaana Galinay Naxariistanada, wuxuuna ka mid ahaa kuwa Suuban.

وَأَدْخَلْنَٰهُ فِي رَحْمَتِنَآ إِنَّهُۥ مِنَ ٱلصَّٰلِحِينَ ٧٥

76. (Nabi) Nuuxna waa Korinay, markuu Dhawaaqay mar hore, waana ajiibnay, waana ka Korinay isaga iyo Ehelkiisaba Murugadii Waynayd.

وَنُوحًا إِذْ نَادَىٰ مِن قَبْلُ فَٱسْتَجَبْنَا لَهُۥ
فَنَجَّيْنَٰهُ وَأَهْلَهُۥ مِنَ ٱلْكَرْبِ ٱلْعَظِيمِ ٧٦

77. Waana uga Gargaaray Qoomkii Beeniyey Aayaadkanaga, waxayna ahaayeen Qoom Xun waana Maanshaynay Dhammaantood.

وَنَصَرْنَٰهُ مِنَ ٱلْقَوْمِ ٱلَّذِينَ كَذَّبُوا۟ بِـَٔايَٰتِنَآ إِنَّهُمْ
كَانُوا۟ قَوْمَ سَوْءٍ فَأَغْرَقْنَٰهُمْ أَجْمَعِينَ ٧٧

**Aayadahanna waxay ka warrami Qaar ka mid ah Nabiyadii Sida Nabi Ibraahim, Luudh, Isxaaq, Yacquub iyo Nuux, iyo sida Eebe uga Koriyey Qoomamkoodii Daalimiinta ahaa ee Xaqa ka Jeedsaday kana Madax Adaygay, Cidhibtii Fiicnaydna waxay u Hadhay Nabiyadii iyo Mu'miniintii Xaqa ku Raacday, Khasaare iyo Halaagna wuxuu u Dambeeyey Gaaladii Xaqa Diiday. Warka Nabiyadaasna meelo Badan oo Quraanka ah Yuu Faah Faahsanyahay, Waxaase Muhiim ah in lagu Waano Qaato Xaqana la Raaco. Al-Anbiyaa' (71-77).**

---

78. Xusuuso (Nabi) Daawuud iyo (Nabi) Suleymaan markay Xukumayeen Beerta markuu Daaqay Adhi Qoom (Dad) waxaana ahayn kuwa Xukunkooda u Maraga (Arka).

وَدَاوُۥدَ وَسُلَيْمَٰنَ إِذْ يَحْكُمَانِ
فِي ٱلْحَرْثِ إِذْ نَفَشَتْ فِيهِ غَنَمُ ٱلْقَوْمِ
وَكُنَّا لِحُكْمِهِمْ شَٰهِدِينَ ٧٨

79. Waxaana Fahansiinay Sulaymaan, Dhammaanna waxaan Siinay Xukun iyo Cilmi, waxaana u Sakhirray Daawuud Buuraha iyagoo la Tasbiixsan iyo Shimbiraha, waana Fallaa «karraa».

فَفَهَّمْنَٰهَا سُلَيْمَٰنَ ۚ وَكُلًّا ءَاتَيْنَا حُكْمًا وَعِلْمًا ۚ
وَسَخَّرْنَا مَعَ دَاوُۥدَ ٱلْجِبَالَ يُسَبِّحْنَ وَٱلطَّيْرَ ۚ
وَكُنَّا فَٰعِلِينَ ٧٩

80. Waxaana Barray Daawuud Samaynta Duruucda inay Idinka Dhawrto Dagaalkiina, ee ma Tihiin kuwo Mahadin.

وَعَلَّمْنَٰهُ صَنْعَةَ لَبُوسٍ لَّكُمْ لِتُحْصِنَكُم
مِّنۢ بَأْسِكُمْ ۖ فَهَلْ أَنتُمْ شَٰكِرُونَ ٨٠

81. Suleymaanna waxaan u Sakhirray Dabaysha iyadoo Daran oo ku Socota Amarkiisa Xaggii Dhulkii ahaa kaan Barakaynay Dhexdiisa, waxaana Nahay Kuwo wax walba Og.

وَلِسُلَيْمَٰنَ ٱلرِّيحَ عَاصِفَةً تَجْرِي بِأَمْرِهِۦٓ إِلَى ٱلْأَرْضِ
ٱلَّتِي بَٰرَكْنَا فِيهَا ۚ وَكُنَّا بِكُلِّ شَيْءٍ عَٰلِمِينَ ٨١

82. Shaydaamadana, waxaan uga Sakhirray Kuwo u Dhumban (Badda),

وَمِنَ ٱلشَّيَٰطِينِ مَن يَغُوصُونَ
لَهُۥ وَيَعْمَلُونَ عَمَلًا دُونَ ذَٰلِكَ ۖ

وَكُنَّا لَهُمْ حَٰفِظِينَ ﴿٨٢﴾

una Fala Camal aan kaas ahayn Anagaana Ilaalinna.

**Sidoo kale Nabi Daawuud iyo Wiilkiisii Nabi Şulaymaan Iyagana Quraanku Meeluu kaga Hadlay, Mid walbana Wuxuu Eebe Siiyey Xukun iyo Cilmi, waxaana loo Sahlay Daawuud, Buuraha, Shimbiraha iyo Sameynta Qalabka Dagaalka, Sidoo kale waxaa loo Fududeeyey Nabi Suleymaan Dabaysha oo ku Sucon Amarkiisa iyo Shayaadiinta kuwo ka Shaqeeya Bad iyo Shaqa kalaba. Nabiguna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Wuxuu Yidhi: Garsoorayaashu waa Seddex, Mid Jannaduu Gali, Labana Naarta, Midka Xaqa yaqaan oo Xukuma Jannaduu Gali, Mid Jaahilnimo wax ku Xukuma Naartuu Gali, Mid Xaqa Yaqaan oo Xukuma wax ka Duwanna Naartuu Gali. Taasina waxay ku Tusin Ahmiyadda Cadaaladda iyo in Dadku ku Qaybsami, ama Janno ama Naar. Al-Anbiyaa' (78-82).**

---

وَأَيُّوبَ إِذْ نَادَىٰ رَبَّهُۥٓ أَنِّى مَسَّنِىَ ٱلضُّرُّ
وَأَنتَ أَرْحَمُ ٱلرَّٰحِمِينَ ﴿٨٣﴾

83. (Xusuuso) Ayuubna markuu u Dhawaaqay Eebihiis (Isagoo Dhihi) Aniga waxaa I taabtay Dhib Adiguna waxaad Tahay Naxariis Badane.

فَٱسْتَجَبْنَا لَهُۥ فَكَشَفْنَا مَا بِهِۦ مِن ضُرٍّ
وَءَاتَيْنَٰهُ أَهْلَهُۥ وَمِثْلَهُم مَّعَهُمْ رَحْمَةً
مِّنْ عِندِنَا وَذِكْرَىٰ لِلْعَٰبِدِينَ ﴿٨٤﴾

84. Waana Ajiibnay Waxaana ka Faydnay waxa Haya oo Dhiba, waxaana Siinay Ehelkiisii iyo wax la mid ah Naxariis Xagganaga ah Darteed iyo Waanada Caalamka.

وَإِسْمَٰعِيلَ وَإِدْرِيسَ وَذَا ٱلْكِفْلِ كُلٌّ
مِّنَ ٱلصَّٰبِرِينَ ﴿٨٥﴾

85. Xusuuso Ismaaciil, Idiriis, Dulkifli Dhammaan waxay ka mid ahaayeen kuwa Samra.

وَأَدْخَلْنَٰهُمْ فِى رَحْمَتِنَآ إِنَّهُم
مِّنَ ٱلصَّٰلِحِينَ ﴿٨٦﴾

86. Waxaana Dhex galinay Naxariis tanada waxayna ka Mid ahaayeen kuwa Suuban.

وَذَا ٱلنُّونِ إِذ ذَّهَبَ مُغَٰضِبًا فَظَنَّ أَن لَّن نَّقْدِرَ
عَلَيْهِ فَنَادَىٰ فِى ٱلظُّلُمَٰتِ أَن لَّآ إِلَٰهَ إِلَّآ أَنتَ
سُبْحَٰنَكَ إِنِّى كُنتُ مِنَ ٱلظَّٰلِمِينَ ﴿٨٧﴾

87. Nabi Yuunus (Xusuuso) markuu Tagay isagoo Cadhaysan una Maleeyey Inaanaan Cidhiidhyayn korkiisa oo uu ku Dhawaaqay Mugdiyada Dhexdooda Ilaah aan Adi Ahayn ma Jiro Nasahnaantaada Anigu waxaan ka Mid ahaa kuwa Daalimiinta ah.

فَٱسْتَجَبْنَا لَهُۥ وَنَجَّيْنَٰهُ مِنَ ٱلْغَمِّ
وَكَذَٰلِكَ نُۨجِى ٱلْمُؤْمِنِينَ ﴿٨٨﴾

88. Waana Ajiibnay kana Korinay Murugtii, Saasaana u Korinaa Mu'miniinta.

وَزَكَرِيَّآ إِذْ نَادَىٰ رَبَّهُۥ رَبِّ لَا تَذَرْنِى فَرْدًا
وَأَنتَ خَيْرُ ٱلْوَٰرِثِينَ ﴿٨٩﴾

89. Zakariyana (Xusuuso) markuu u Dhawaaqay Eebihiis isagoo leh Eebow hayga Tagin Anoo Kali ah Adaa u Khayrroon Cid wax Dhaxashee «u hadhee».

فَٱسْتَجَبْنَا لَهُۥ وَوَهَبْنَا لَهُۥ يَحْيَىٰ
وَأَصْلَحْنَا لَهُۥ زَوْجَهُۥٓ إِنَّهُمْ كَانُوا۟

90. Waana Ajiibnay waxaana Siinay Yaxye waxaana u Hagaajinay Hawee-

naydiisii, waxayna ahaayeen kuwo u Deg dega Khayraadka oo Na barya iyagoo Rajayn oo Cabsan waxayna ahaayeen kuwa Noo Khushuuca.

يُسَٰرِعُونَ فِي ٱلۡخَيۡرَٰتِ وَيَدۡعُونَنَا
رَغَبٗا وَرَهَبٗاۖ وَكَانُواْ لَنَا خَٰشِعِينَ ٩٠

**Aayadahan waxay ka Warrami Xaalkii Nabiyadaas iyo sida Eebe U Ajiibay Dhammaantood ugana Koriyey Dhibkii,Saasaana Eebe u Aqbalaa Baryada Dadka Dhibban ee Wanwanaagsan, waxaana Shardi ah in si Dhab ah loo Caabudo Eebe Looguna Hogaansamo Xaqana la raaco Xumaanna laga Fogaado. Al-Anbiyaa' (83-90).**

---

91. Tiina (Xusuuso) Dhawrtay Xubinteedaa waa (maryama) oon ku Afuufnay Dhexdeeda Ruuxdanadii kana yeellay iyada iyo Wiilkeeda Calaamadda Caalamka.

وَٱلَّتِيٓ أَحۡصَنَتۡ فَرۡجَهَا فَنَفَخۡنَا فِيهَا
مِن رُّوحِنَا وَجَعَلۡنَٰهَا وَٱبۡنَهَآ
ءَايَةٗ لِّلۡعَٰلَمِينَ ٩١

92. Tani waa Diintiinii waana Diin kaliya Aniguna waxaan Ahay Eebihiin ee I caabuda.

إِنَّ هَٰذِهِۦٓ أُمَّتُكُمۡ أُمَّةٗ وَٰحِدَةٗ
وَأَنَا۠ رَبُّكُمۡ فَٱعۡبُدُونِ ٩٢

93. waxayse isku Khilaafeen Amarkoodii Dhexdooda Dhammaanna Xagaygaa loo soo Celin.

وَتَقَطَّعُوٓاْ أَمۡرَهُم بَيۡنَهُمۡۖ كُلٌّ إِلَيۡنَا
رَٰجِعُونَ ٩٣

94. Ruuxii Fala Wanaag isagoo Mu'min ah lagama Qariyo Camalkiisa Anaguna waan u Qoraynaa.

فَمَن يَعۡمَلۡ مِنَ ٱلصَّٰلِحَٰتِ وَهُوَ مُؤۡمِنٞ فَلَا
كُفۡرَانَ لِسَعۡيِهِۦ وَإِنَّا لَهُۥ كَٰتِبُونَ ٩٤

95. Waxaa ka Reebban Magaalo aan Halaagnay inay soo Noqoto «Soo bixin ka hor».

وَحَرَٰمٌ عَلَىٰ قَرۡيَةٍ أَهۡلَكۡنَٰهَآ أَنَّهُمۡ
لَا يَرۡجِعُونَ ٩٥

96. Inta laga Furi soo (Dayn) Yaajuuj iyo Maajuuj iyaguna Jaho Sarreysa Dhaammanteed yey ka soo Deg degi.

حَتَّىٰٓ إِذَا فُتِحَتۡ يَأۡجُوجُ وَمَأۡجُوجُ
وَهُم مِّن كُلِّ حَدَبٖ يَنسِلُونَ ٩٦

97. Waxaa Dhawaaday Yaboohii Xaqa Ahaa waxaana soo bixi inaytaagnaan Indhaha kuwa Gaaloobay (Iyagoo Dhihi) Halaaganagee waxaan kaga Sugnayn Halmaansho kan Waxaanse ahayn Daalimiin.

وَٱقۡتَرَبَ ٱلۡوَعۡدُ ٱلۡحَقُّ فَإِذَا هِيَ شَٰخِصَةٌ
أَبۡصَٰرُ ٱلَّذِينَ كَفَرُواْ يَٰوَيۡلَنَا قَدۡ كُنَّا
فِي غَفۡلَةٖ مِّنۡ هَٰذَا بَلۡ كُنَّا ظَٰلِمِينَ ٩٧

**Maryam Bintu Cimraanna wax badan yuu Quraanku ka warramay Sharafteedii iyo Sida Eebe u Dhawray ugana yeelay Iyada iyo Wiilkeedii Aayad iyo Calaamad Caalamka. Eebana waa Kali wuxuuna Mutaa in Isaga uun La Caabudo, Dadkiise way kala tageen oo Iskhilaafeen. Rasuuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa ha yeelee) Wuxuu Yidhi: annagu Nabiyada hadaan nahay Diintanadu waa mid (kaliya). Taasoo Macnaheedu yahay in waxyaabaha Waaweyn Diinuhu Iskaga mid Yihiin. Eebaase loo Noqon Cid walbana ka Abaal marin waxay kasbatay, cid la Halaagayna Adduunka uma Soo noqoto inta Dadka laga soo Bixin oo Qiyaame la Gaadhi oo ay ka soo Bixi yaajuuj iyo maajuuj oo Waqtigu ka Dhawaado, markaasoo Kuwa Gaaloobay ay Indha Taagi Iyagoo Sheegi Inay Halaagsameen Daalimiinna Ahaayeen'Halmaanshana kaga Sugnaayeen Qiyaamada, waxse ma taro Calaacal Waqtigaas ee waxaa wax Tari Wanaaggii la Hormarsaday. Al-Anbiyaa' (91-97).**

98. Idinka iyo waxaad Caabudaysaan oo Eebe ka Soo hadhay waxay Noqon Shidaalka Jahannamo idinkuna waad ku Arooraysaan.

إِنَّكُمْ وَمَا تَعْبُدُونَ مِن دُونِ
ٱللَّهِ حَصَبُ جَهَنَّمَ أَنتُمْ لَهَا وَٰرِدُونَ ٩٨

99. Hadday Yihiin kuwaasu Ilaahyo kuma Arooreen,Dhamaanna way ku Waari.

لَوْ كَانَ هَٰٓؤُلَآءِ ءَالِهَةً مَّا وَرَدُوهَا
وَكُلٌّ فِيهَا خَٰلِدُونَ ٩٩

100. waxay ku Yeelan Dhexdeeda Qaylo,waxna Dhexdeeda kuma Maqlaan.

لَهُمْ فِيهَا زَفِيرٌ وَهُمْ فِيهَا لَا يَسْمَعُونَ ١٠٠

101. kuway u Hor martay Xagganaga Wanaag kuwaasu Xaggeeda waa laga Fogayn.

إِنَّ ٱلَّذِينَ سَبَقَتْ لَهُم مِّنَّا ٱلْحُسْنَىٰٓ أُوْلَٰٓئِكَ
عَنْهَا مُبْعَدُونَ ١٠١

102. mana Maqlaan Shanqadhteeda iyaguna waxay Doonto Naftoodu yey ku Waari.

لَا يَسْمَعُونَ حَسِيسَهَا وَهُمْ فِى مَا ٱشْتَهَتْ
أَنفُسُهُمْ خَٰلِدُونَ ١٠٢

103. mana Walbahaariyo Argagaxii Waynaa,waxayna kula kulmi Malaa'igtu kani waa Maalintiinnii ah Tii laydiin Yaboohay.

لَا يَحْزُنُهُمُ ٱلْفَزَعُ ٱلْأَكْبَرُ وَتَتَلَقَّىٰهُمُ
ٱلْمَلَٰٓئِكَةُ هَٰذَا يَوْمُكُمُ ٱلَّذِى
كُنتُمْ تُوعَدُونَ ١٠٣

104. waana Maalintaan u Duubayno Samada Sida loo Duubo Warqadaha Kitaabka, Sidaan ku Billownay Abuuriddii hore Yaana ku soo Celinaynaa, waa Yabooh korkanaga ah,annagaana Falna saas.

يَوْمَ نَطْوِى ٱلسَّمَآءَ كَطَىِّ ٱلسِّجِلِّ لِلْكُتُبِ
كَمَا بَدَأْنَآ أَوَّلَ خَلْقٍ نُّعِيدُهُۥ وَعْدًا عَلَيْنَآ
إِنَّا كُنَّا فَٰعِلِينَ ١٠٤

105. Dhab ahaan waxaan ugu Qorray Zabuur Sheegid ka Dib (Luuxul Maxfuudka) Dhulka waxaa Dhaxli Addoomadayda Suuban.

وَلَقَدْ كَتَبْنَا فِى ٱلزَّبُورِ مِنۢ بَعْدِ ٱلذِّكْرِ
أَنَّ ٱلْأَرْضَ يَرِثُهَا عِبَادِىَ ٱلصَّٰلِحُونَ ١٠٥

106. kan Gaadhsiin baa ugu Sugan CiddiiCaabudi (Eebe).

إِنَّ فِى هَٰذَا لَبَلَٰغًا لِّقَوْمٍ عَٰبِدِينَ ١٠٦

107. kumana aanaan Dirin Naxariista Caalamka adoo ah Mooyee.

وَمَآ أَرْسَلْنَٰكَ إِلَّا رَحْمَةً لِّلْعَٰلَمِينَ ١٠٧

Ciddii wax Eebe ka soo hadhay Caabudda iyo cidday Caabudeenba oo ka Raalli ah waxay noqon Shidaalka Naarta, Ciddii Wanaag ugu hor maray Eebe waa laga Fogayn, mana maqlo shanqadheeda, wuxuu Doonana jannaduu ka helaa, mana ka Naxo Argagaxa Qiyaamada, Malaa'igtaana u bishaarayn, waana Maalinta Cirka la Duubi'Dhulka Jannada iyo kan Adduunba waxaa u Hadhi Mu'miniinta Suubban, Quraankuna waa Gaadhsiin'Rasuulkuna waa naxariista Caalamka, Rasuulkuna (Naxariis iyo Nabadgalyo Eebe korkiisa yeelee) wuxuu yidhi: Layma Bixinin anoo wax Lacnada ee waxaa uun lay bixiyey Anoo Naxariis ah, Muslim. (Muslim). Al-Anbiyaa' (98-107).

108. Waxaad Dhahdaa waxaa uun lay Waxyooday Aniga in Ilaaheennu Ilaah kaliya yahay ee Idinku Muslimiin ma Tihiin (Ma Hogaansameysaan).

قُلْ إِنَّمَا يُوحَىٰٓ إِلَيَّ أَنَّمَآ إِلَٰهُكُمْ إِلَٰهٌ وَٰحِدٌ فَهَلْ أَنتُم مُّسْلِمُونَ ﴿١٠٨﴾

109. Haddayse Jeedsadaan waxaad Dhahdaa waxaan idin Ogaysiiyey si Siman (Cad) Colnimo Mana Ogi inay Dhawdahay ama Fogtahay waxa laydiin Yaboohay.

فَإِن تَوَلَّوْا۟ فَقُلْ ءَاذَنتُكُمْ عَلَىٰ سَوَآءٍ وَإِنْ أَدْرِىٓ أَقَرِيبٌ أَم بَعِيدٌ مَّا تُوعَدُونَ ﴿١٠٩﴾

110. Eebe wuxuu Ogyahay waxa lala Qaylyo oo Hadala wuxuuna Ogyahay waxaad Qarinaysaan.

إِنَّهُۥ يَعْلَمُ ٱلْجَهْرَ مِنَ ٱلْقَوْلِ وَيَعْلَمُ مَا تَكْتُمُونَ ﴿١١٠﴾

111. Mana Ogi waxay u Dhawdahay inay Fidmo idiintahay iyo Raaxo Tan iyo Muddo.

وَإِنْ أَدْرِى لَعَلَّهُۥ فِتْنَةٌ لَّكُمْ وَمَتَٰعٌ إِلَىٰ حِينٍ ﴿١١١﴾

112. Wuxuu yidhi (Nabigu) Eebow ku kala Xukun (Dhexdanada) Xaq, Eebahanana waa Raxmaan ee Looga Kaalmo waydiisto waxaad Sheegaysaan.

قَٰلَ رَبِّ ٱحْكُم بِٱلْحَقِّ وَرَبُّنَا ٱلرَّحْمَٰنُ ٱلْمُسْتَعَانُ عَلَىٰ مَا تَصِفُونَ ﴿١١٢﴾

**Eebe waa Kali,Isagayna waajibtahay in Loo Hogaansamo, Ciddiise Jeedsata ha Ogaato si Cad inay Eebe iyo Rasuulkiisa la Colloowday,Kolleyna waa kii Gaalo la Ciqaabo ama ha Dhawaato ama ha Dib Dhacdo Muddee, Eebana waa Ogyahay wax kasta ama Ha la Muujiyo ama Ha la Qarsadee, Dib u Dhigidda Ciqaabtuna waxaa Suurowda inay tahay Imtixaam iyo u Raaxayn Muddo.**
**Eebana isagaa ah Xaakimka Caadilka ah, Sharcigiisaana Caadil ah, Isagaana looga Kaalmo waydiistaa Dhibaatada iyo waxay Gaaladu Sheegi oo Xumaan ah. Nabiga iyo Nabiyadii kalaba Nabadgalyo Eebe korkooda ha yeelee waxay Dhihi jireen Eebow Cadaalo nagu kala Xukun Anaga iyo Qoomkanaga. Al-Anbiyaa' (108-112).**

# Suurat Al-Xajj سُورَةُ الحَجِّ

Magaca Eebe yaan ku Billaabaynaa ee Naxariis Guud iyo Mid gaaraba Naxariista.

بِسْمِ ٱللَّهِ ٱلرَّحْمَٰنِ ٱلرَّحِيمِ

1. Dadaw ka Dhawrsada Eebihiin Maxaayeelay Gilgilashada Saacadda (Qiyaame) waa wax wayn (Daran).

يَٰٓأَيُّهَا ٱلنَّاسُ ٱتَّقُوا۟ رَبَّكُمْ إِنَّ زَلْزَلَةَ ٱلسَّاعَةِ شَىْءٌ عَظِيمٌ ﴿١﴾

2. Waana Maalintaad Arkaysaan Iyadooy Halmaami Mid wax Nuujisa

يَوْمَ تَرَوْنَهَا تَذْهَلُ كُلُّ مُرْضِعَةٍ عَمَّآ